

IIB MA GALO

**FAAFINTA**



**RASMIGA AH**

**الرسومية**

**الجريدة**

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهوريه الصوماليه المقرطيه

Sannadka 10aad Muqdisho, 30 Agoosto 1982 L. 2 r 8

**FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA**

جريدة شهريه

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadka waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaa-bmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh.—Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Waa-radda Lacagta.

K O O B N I I N

S H A R C I

QAYBTA

KOWAAD

W. M.

QAYBTA

LABAAD

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 26 ee 14 Agoos. 1982, Dhisid Maxkamado Dagaal ee Ciidamada Qalabka sida.

BOG. 671

SHARCI L. 27 ee 9 Agoos. 1982, Dhismaha Guddiga Difaaca iyo Nabad gelyada ee Qaranka.

» 674

SHARCI L. 28 ee 21 Agoos. 1982, Isbiddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1981.

» 677

SHARCI L. 29 ee 21 Agoos. 1982, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1982.

» 679

SHARCI Lambar 27 taariikh 9 Agoos. 1982  
Dhismaha Guddiga Difaaca iyo Naba  
dgelyada ee Qaranka.

## MADAXWEYNHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga  
Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

## WUXIU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo socda:

Qod. 1aad

(Dhismaha Guddiga)

Waxaa la dhisay Guddiga Difaaca iyo Nabadgelya da ee Qaranka.

Qod. 2aad.

(Koobnaanta Guddiga)

Madaxweynaha J.D.S. Waa Guddoomiyaha Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada ee Qaranka, waxaana xubno ka ah Guddiga Siyaasadda ee Xisbiga Hantiwa daagga Kacaanka Soomaaliyed, Wasiirka Wasaarad da Gaashaandhigga, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Qod. 3aad.

## (Waajibaadka Guddiga)

Waajibaadka Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada ee Qaranka wuxuu yahay.

1. Inuu si joogta ah ula socdo, una qiimeeyo xaaladda Difaaca iyo Nabadgelyada ee Qaranka.
  2. Inuu ka haqabtiro Ciidammada iyo Hay'adaha ka le ee u xilsaaran Difaaca iyo Nabadgelyada, had

3. Inuu si joogta ah ugu baraarajiyo Hay'adaha u xil saaran Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranka. guda shada waajibaadka.
4. Inuu kiciyo, Abaabulo, kuna baraarajiyo Shacbiwe ynaha Soomaaliyeed iyo Hay'adaha kale ee Qaran ka ka qaybqaadashada Difaaca iyo Nabadgelyada Dalka.

Qod. 4aad.

(Awoodda Guddiga)

Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu qaado tal laabokasta oo uu ku sugayo jiritaanka, midnimada iyo xasilloonaanta Qaranka, haddii laga reebo awoodaha gaarka u ah Madaxweynaha J.D. Soomaaliya.

Qod. 5aad.

(Shirka Guddiga)

1. Guddigu wuxuu Shirkiisa ku yeelanayaa meel kas too ka mid ah Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soo maaliya, Bishii hal mar, markii ay xaaladda Difaa ca iyo Nabadgelyada Dalku caadi tahay.
2. Mar kasta oo ay jirto baahi ka dhigaysa lagama maarmaan, Guddoomiyuhu si deg deg ah ayuu isu gu yeeri karaa Guddiga, isaga ayaana xaddida ka ltanka Shirka.

Qod. 6aad.

(Guddi Hoosaad)

Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranku wu xuu yeelan karaa Guddi Hoosaa.

Qod. 7aad.

(Shirka Guddi Hoosaadka)

Guddigi Hoosaadku wuxuu shiraan markii ay xaa laddu caadi tahay 15kii maalmoodba mar, iyadoo Gud doomiyaha Guddi Hoosaadku tilmaamayo meesha la gu shirayo, wuxuuna warbixintiisa iyo soojeedintiisa u soo gudbinayaa Guddoomiyaha Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada ee Qaranka.

Qod. 8aad.

(Burin)

Sharci kasta oo kan ka horreeyey oo ka hadlaya arrintan waa la buriyey.

Qod. 9aad.

(Dhaqangal)

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Juun 1982, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)